



# Mashruucaaga Ka ilaalinta Cimilada Guriga—

## MUDDADA WAKHTIGA



- (1) **Tamar Baarida:** Marka ay tamar baarayaasha dhammaystiraan warbixintooda, oo la ogaado shaqada gurigu uu u baahan yahay in laga qabto. La hadal tamar baarahaaga si aad u ogaato shaqada la qorshayn doono iyo sidee baa laga yaabaa inay gurigaaga u saameyn.
- (2) **Qaybta Farsameed (Tallaabooyinka):** Qandaraasle farsama yaqaan ah ayaa loo xulayaa inuu shaqada ka qabto gurigaaga. Shaqadani tallaabooyin dhowr ah ayay ka kooban tahay laakiinse caadi ahaan waa dayactirka ama beddelida kulalyiyaha iyo ku xirida marawaxadda.
- (3) **Baaris Farsameed:** Baaristani waain lagu hubiyo in dhammaan hagaajinta loo qabtay qaabka sare ee uu filayo barnaamijka ka ilaalinta cimilada guriga.
- (4) **Qaybta Dahaarista (Tallaabooyinka):** Qandaraasle Dahaar ah ayaa loo xulayaa inuu shaqada ka qabto gurigaaga, caadi ahaan dahaar gelinaya meesha u baahan, daboolaya meelaha guriga hawadu ka soo galayso, iyo laga yaabo inay ku jirto tallaabooyin kale hadba sidii loogu baahdo.
- (5) **Baarista Xakameynta Tayada:** Baarista Xakameynta Tayadu waxay qiimeynaysaa badbaadada iyo wax ku oolnimada dhammaan hagaajinta ay gurigaaga ka qabteen qandaraaslayaashu iyo shaqaalaha ka ilaalinta cimilada guriga.



## FILASHOoyin

### Dhammaystir

Hadafkayagu/Yoolkeynu waa in aan ku dhameystirno shaqada bilowga ilaa dhameenta sagaashan maalmood gudahood.

### Waxa la Filayo

Wada xiriirka iyo ixtiraamka ka dhexeeya macmiilka iyo shaqaalaha ka ilaalinta cimilada guriga waa muhiim. Ka filo in shaqaalaheena iyo qandaraaslayaasheena ay noqdaan dad anshax leh, wakhtigooda aan ka dib dhicin iyo ah dad xirfadleyaal ah. Weydii haddii uu jiro wax lagaaga baahan yahay inaad sameyso si aad u diyaariso gurigaaga booqashada ka hor; waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad bannayso armaajooyinka u furan saqfiga, ama meelaha kale ee goobaha shaqada ee shaqaalaha ka ilaalinta cimilada guriga u baahan yihiin.

